IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 25ka Sebt. 1988 L. 1 r 9

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER-SHARCI L. 9 ee 18 Agoosto 1988, Kordhin Mushaharka iyo Gunnada Shaqaalaha Dawladda. Bog; 692

XEER MADAXWaaYNAHA JDS L. 49 ee 15 Agoosto 1988, Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS ee Bankiga Adduunka. » 693

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 20 Agoosto 1988, Magacaabid Nootaayo. » 694

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 51 ee 17 Luulyo 1988, Magacaabid Nootaayo. » 695

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 15 Agoosto 1988, Magacaabid Nootaayo. » 696

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 20 ee 17.8.1988, Aqoonsi Urur Samafal Caritas Soomaali. » 697

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 17 ee 14.8.1988, Aqoonsi Markaska Islaamka Geeska Afrika. » 698

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1260170 ku qoran Faaduma Cabdullaahi Saciid L. 441 » 699

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cawaale Fariid L. 442 » 700

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0198023 ku qoran Xuseen Axmed Shabaab L. 443 » 701

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Faysal Xasan Cali L. 444 » 702

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0118105 ku qoran Xaawo Axmed Maxamuud L. 445 » 703

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Ahmed Sh. Muuse L. 446 » 704

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Daahir Xuseen Cadaawe L. 447 » 705

MAXKAMADDA G. SOOL, 118.1988, Lumid 67 Jeeg War. ku qoran Axmed Xasan Saal L. 448 » 706

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cusmaan Cali Maxamed L. 449 » 711

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88, Lumid Buug Kayd L. 4003 ku qoran Maxamed Nuuraani Maxamuud L. 450 » 712

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1084362 ku qoran Warsame Muumin Cumar L. 451 » 713

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.9.88. Lumid Jeeg War. L. 0373125 ku qoran Jeylaani Munye Qulateen L. 452 » 714

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.9.88. Lumid Jeeg War. L. 0722833 ku qoran Aamina Jaamac Nuur L. 453 » 715

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1209567 ku qoran Maxamed mar L. 455 » 616

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran X. Dahabo Xersi Cu-Xasan Barre L. 454 » 617

Xeer_Sharci lambar 9, taariikh 18.8.1988 Kordhin mushaarka iyo gunnada Shaqaalaha Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida degdegga ah ee loo qabo in tallaabo laga qaado daryeelidda nolosha Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka iyo Ciidammada, sarena loo qaado awooddooda dhaqaale;

MARKUU TIXGELIYEY: In sidoo kale tallaabo middaas la mid ah laga qaado macaashka ay qaataan Hawlgabayaashu;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer_sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Mushaarka iyo gunnada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda iyo Hay'adaha raacsan waxaa la krodhiyey 100% (boqolkiiba_boqol).

2. Mushaarka iyo gunnada Ciidammada Qalabka Sida waxaa la kordhiyey 50% (boqolkiiba_konton). qiimaha raashinka la siiyana waxaa la kordhiyey 100% (boqolkiiba_boqol).

Qod. 2aad

Macaashka Hawlgabayaasha Siyaasiyiinta ah, Shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo Ciidammada Qalabka Sida waxaa la kordhiyey 100% boqolkiiba_boqol).

Qod. 3aad

Kororsiimadan waxay ka billaabanaysaa 1da Luulyo 1988.

Qod. 4aad

Xeerkan sharci waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda isagoo loo gudbin doono Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 18.8.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS Lr. 49 ee 15.8.1988, Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS ee Bankiga Adduunka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Go'aannada Golaha Guddoomiyeyaasha Bankiga Adduunka (IBRD) lambar 395 iyo 410 ee 30ka Agoosto 1984, iyo 19ka Maajo 1986, kuna saabsan kordhinta Saamiga Rasumaalka Bankiga Adduunka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la kordhiyo Saamiyada ay ku leedahay Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Rasumaalka Bankiga Adduunka;

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay kordhisay Saamiyada ay ku leedahay Rasumaalka Bankiga Adduunka, si waafaqsan faqradaha 3 iyo 4 iyo faqradaha 4 iyo 5 ee go'aanka Golaha Guddoomiyeyaasha lambar 395 iyo 410 ee isla Golahaas, soo wada baxay 30ka Agoosto 1984, iyo 19ka Maajo 1986.

Qod. 2aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda waxaa awood loo siiyey inuu ka qaybgalka kordhinta Saamiyada Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku wargeliyo Guddoonka Bankiga Adduunka, qaadana tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta ka qaybgalka.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla maanta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15.8.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 20 Agoosto 1988, Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah u magacaabo Notaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Cumar Colaad Cabdi waxaa loo magacaabay Notaayo, wuxuuna hawshiisa Notaayenimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla markii uu saxiixo Madaxwepnaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 51 ee 17 Luulyo 1988, Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.1966 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo sacda:

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1966, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo Muqdisho: J.le Dr. Cabdulqaadir Maxamed Faarax iyo J.le Dr. Maxamed Xuseen Nuur.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17 Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 15 Agoosto 1988, Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 ee ku saabsan minnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELIYEY Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo sacda:

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabay Nootaayo Xamar, JAALLE MAXAMUUD CARTAN CALI.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 20 ee 17.8.88,
Aqoonsi Ururka Samafalka CARITAS SOMALIA.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururrada noocan ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka CARITAS SOMALIA oo ah urur samafal, ujeeddadiisu tahay Taageeridda dadka Saboolka ah, Tababaridda xagga Xirfadaha iyo Horumarinta Mashaariicda.

Qod. 2aad

Ururku wuxuu saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 17.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 21 ee 16 Agoosto 1988, Aqoonsi Markaska Islaamka Geeska Afrika.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka iyo Barnaamijka lagu dhisay Markaskaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: inay lagama maarmaan tahay abuurista Markaska noocaan ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Markaska Islaamka ee Geeska Afrika oo ah Markas Diini ah, Ujeeddadiisu tahay Baahinta Diinta Islaamka, Baridda Afdayda Qur'aanka, Cilmiyada la xiriira Barashada Diinta Islaamka iyo Afka Carabiga, iyo ku dhiirrigelinta Dadweynaha Dhismaha Dugsiyada iyo Masaajidada.

Qod. 2aad

Markaskani wuxuu saldhiggiisa noqonayaa Magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 14.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Cabdullaahi Saciid;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1260170 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mire Cabdullaahi Axmed sida ku cad warqadda lam. 9683 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1260170 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mire Cabdullaahi Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Faadumo Cabdullaahi Saciid lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100 000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yaravn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
( Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi )

L. 441

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cawaale Fariid;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Ismaaciil Cali Xasan sida ku cad warqadda lam. 9286 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Taariikh | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|---|
| 158556 | 500 000 | 12.5.88 | Ismaaciil Cali Xasan | Xarunta |
| 158557 | 500.000 | » | » » » | » |
| 158558 | 500.000 | » | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Lnta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Ismaaciil Cali Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Cawaale Fariid lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
( Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi )

L. 442

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muxiya_diin Xasan Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0198023 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo_maaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Axmed Shabaab sida ku cad warqadda lam. 1620 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo_maaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 0198023 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran ma_gaca J.le Xuseen Axmed Shabaab.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J le Muxiyadiin Xasan Cali lacagta uadadee_du tahay Sh.So. 300 000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qo_ran. markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal_mood laga bilaabo maal'nta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishor_taag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
( Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi )

L. 443

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Feysal Xasan Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 1246571-1246572 oo laga sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Feysal Xasan Cali sida ku cad warqad-da Lam. 9682 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta 2aad Tr. 4.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1246571-1246572 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna qoran magaca Feysal Xasan Cali kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-liyeed in ay siiso J.le Feysal Xasan Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor xu-san markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal-mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishor-taag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 444

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Xaawo Axmed Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0118205 oo laga sameeyey Laanta B/Xaawo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 179.000, kuna qoran magaca J.le Xaawo Axmed Maxamuud, sida ku cad warqadda Lam. 9750 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0118205 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna qoran magaca Xaawo Axmed Maxamuud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 179.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta B/Xaawo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xaawo Axmed Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 179.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 445

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 1116343-1116344 laga sameeyey Laanta Jamaame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse sida ku cad warqadda lam. 9939 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1961

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 1116343-1116344 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame kuna qoran magaca Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Jamaame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 446

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Daahir Xuseen Cadaawe;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Laanta 1aad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 650,000 kuna qoran magaca Daahir Xuseen Cadaawe, sida ku cad warqadda Lam. 10045 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa Tr. 13.9.88;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Taarikh | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|---|
| 0089675 | 450.000 | 19.5.88 | Daahir Xuseen Cadaawe | 1/Har. |
| 0089696 | 200.000 | 19.5.88 | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabiiyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa kuna qoran magaca Daahir Xuseen Cadaawe kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 650.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Daahir Xuseen Cadaawe lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 650.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 447

MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL LASCANOD

L,MGS/68/88,- Tr. 11.8.88,-

IYADOO ARAGTAY: Dacwadda kor ku qoran;

IYADOO ARAGTAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Taararka aan Lambarka lahayn ee ka soo baxay B.G.&.K.S. Laanta L/Caanood ee 9.8.88, 20.6.88 anaana Baafin Jeegag Wareega oo lumay ayna ku jiray Sh.So. 7.372.000/=;

IYADOO ARAGTAY: Qodobka 69aad Sharciga Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.1965;

IYADOO TIXGELISAY: Codsiga dib u cusboonaysiinta J.le Ganacsade Axmed Xasan Salaad.

(JEEGAGGA LUMAY)

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1) | J/Wareega Lam; 0222860 - 861, | ee 5.5.88, | ———— | Sh.So. | 100.000 | Bulo-barde |
| 2) | J/Wareega Lam; 0222876 - 882, | ee 5.5.88, | ———— | Sh.So. | 350.000 | » » |
| 3) | J/Wareega Lam; 0222894 - 896, | ee 5.5.88, | ———— | » | 150.000 | » » |
| 4) | J/Wareega Lam; 0221407 | ee 22.2.88 | ———— | » | 50.000 | » ) |
| 5) | J/Wareega Lam; 0221878 | ee 2.4.88 | ———— | » | 50.000 | » » |
| 6) | J/Wareega Lam; 0222560 | ee 28.4.88 | ———— | » | 50.000 | » » |
| 7) | J/Wareega Lam; 0222631 | ee 30.4.88 | ———— | » | 32.000 | » » |
| 8) | J/Wareega Lam; 0221882 | ee 2.4.88 | ———— | » | 50.000 | » » |
| 9) | J/Wareega Lam; 0249343 | ee 24.4.88 | ———— | » | 50.000 | Dh/mareeb |
| 10) | J/Wareega Lam; 0319618 | ee 26.11.87 | ———— | » | 50.000 | Boosaaso |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 11) | J/Wareega Lam; 0679893 | ee 4.5.88 | ——— | » | 50.000 | Burco |
| 12) | J/Wareega Lam; 0679734 | ee 2.5.88 | ——— | » | 40.000 | » |
| 13) | J/Wareega Lam; 0533076 | ee 16.4.88 | ——— | » | 40.000 | » |
| 14) | J/Wareega Lam; 0625242 | ee 28.2.88 | ——— | » | 3.000 | Boosaaso |
| 15) | J/Wareega Lam; 0629812 | ee 23.4.88 | ——— | » | 20.000 | L/caanood |
| 16) | J/Wareega Lam; 075758 | ee 13.3.88 | ——— | » | 100.000 | Boosaaso |
| 17) | J/Wareega Lam; 1055326 | ee 20.2.88 | ——— | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 18) | J/Wareega Lam; 1136445 | ee 9.5.88 | ——— | » | 100.000 | » |
| 19) | J/Wareega Lam; 0679860 | ee 5.4.88 | ——— | » | 50.000 | Burco |
| 20) | J/Wareega Lam; 0641185 | ee 29.2.88 | ——— | » | 40.000 | » |
| 21) | J/Wareega Lam; 0690752 | ee 24.3.88 | ——— | » | 30.000 | 2/Xamar |
| 22) | J/Wareega Lam; 0222707 | ee ——— | ——— | » | 30.000 | Boosaaso |
| 23) | J/Wareega Lam; 0004715 | ee 20.4.88 | ——— | » | 120.000 | Berbera |
| 24) | J/Wareega Lam; 0093170 | ee 5.5.88 | Caasha Diiriye Raage | » | 180.000 | Burco |
| 25) | J/Wareega Lam; 0093162 | ee 5.5.88 | » » » | » | 180.000 | » |
| 26) | J/Wareega Lam; 1135337 | ee 25.4.88 | » » » | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 27) | J/Wareega Lam; 1101663 | ee 7.5.88 | Xasan Nuur Ibraahin | » | 100.000 | Berbera |
| 28) | J/Wareega Lam; 1100710 | ee 17.4.88 | C/qaadir Xaaji Maxamed | » | 100.000 | Burco |
| 29) | J/Wareega Lam; 1120534 | ee 2.4.88 | Maxamed Axmed Cilmi | » | 100.000 | 11/Xamar |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 30) | J/Wareega Lam; 1038473 | ee 25.4.88 | Max'uud Saalax Max'uud | » | 100.000 | C/gaabo |
| 31) | J/Wareega Lam; 1002379 | ee 28.3.88 | Axmed Max'uud Maxamed | » | 100.000 | 5/Xamar |
| 32) | J/Wareega Lam; 0962802 | ee 3.3.88 | Maryan Sh. Maxamuud | » | 100.000 | B/Wayne |
| 33) | J/Wareega Lam; 1136176 | ee 5.5.88 | Axmed Max'uud Wahaabi | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 34) | J/Wareega Lam; 0160166 | ee 15.5.88 | Faarax Aw Yaasiin | » | 500.000 | W/dhiigley |
| 35) | J/Wareega Lam; 0160168 | ee 15.5.88 | » » | » | 163.000 | » |
| 36) | J/Wareega Lam; 0065200 | ee 2.5.88 | Cumar Aadan Xasan | » | 200.000 | Hodan |
| 37) | J/Wareega Lam; 1136936-943 | ee 19.5.88 | Max'ed Ibra. Cabdile | » | 800.000 | Gaalkacyo |
| 38) | J/Wareega Lam; 1152910 | ee 5.5.88 | Caamir Nuur Faarax | » | 100.000 | W/dhiigley |
| 39) | J/Wareega Lam; 1136570 | ee 12.5.88 | Maxamed Axmed Cali | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 40) | J/Wareega Lam; 0241557 | ee 16.5.88 | C/qaadir Ciise Aadan | » | 100.000 | Jawhar |
| 41) | J/Wareega Lam; 1136473 | ee 12.5.88 | Cali Cabdillaahi | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 42) | J/Wareega Lam; 1136505 | ee 11.5.88 | C/kariin Axmed Wahaabi | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 43) | J/Wareega Lam; 1136573 | ee 12.5.88 | Maxamed Axmed Cali | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 44) | J/Wareega Lam; 1136964 | ee 19.5.88 | Faarax Aw Yaasiin | » | 100.000 | » |
| 45) | J/Wareega Lam; 1136965 | ee 19.5.88 | » » » | » | 100.000 | » |
| 46) | J/Wareega Lam; 0531721 | ee 5.4.88 | C/llaahi Aadan Isaaq | » | 50.000 | » |
| 47) | J/Wareega Lam; 0533693 | ee 19.5.88 | Maxamed Ibrahin C/le | » | 40.000 | » |
| 48) | J/Wareega Lam; 0533694 | ee 19.5.88 | » » » | » | 30.000 | » |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| 49) J/Wareega Lam; 0962704 | ee 16.5.88 | Max'ed Saleban Ismacil | » | 100.000 | B/Wayne |
| 50) J/Wareega Lam; 0963305 | ee 27.4.88 | Max'ed C/laahi Xasan | » | 100.000 | » |
| 51) J/Wareega Lam; 0844023 | ee 22.8.87 | Siide Xaaji Diiriye | » | 100.000 | 3/Xamar |
| 52) J/Wareega Lam; 1136566 | ee 12.5.88 | Axmed Guuleed Biixi | » | 100.000 | Gaalkacyo |
| 53) J/Wareega Lam; 0002803 | ee 5.5.88 | Cumar Cali Jaamac | » | 30.000 | Badhan |
| 54) J/Wareega Lam; 0012693 | ee 10.4.88 | Max'ed C/laahi Aadan | » | 20.000 | Boosaaso |
| 55) J/Wareega Lam; 0679545 | ee 26.4.88 | Cabdi Cumar Xasan | » | 50.000 | Burco |
| 56) J/Wareega Lam; 0623673 | ee 23.1.88 | Max'ed Cali Maxamed | » | 5.000 | Boosaaso |
| 57) J/Wareega Lam; 0047778 | ee 2.5.88 | Cabdiraxmaan Abshir | » | 500.000 | W/dhiigley |
| 58) J/Wareega Lam; 0047947 | ee 7.5.88 | » » | » | 500.000 | » |
| 59) J/Wareega Lam; 0662641 | ee 2.5.88 | Max'ed Nuur Tifaw | » | 50.000 | Marka |
| 60) J/Wareega Lam; 0695225 | ee 8.3.88 | Abuukar Axmed Isaaq | » | 50.000 | 1/Xamar |
| 61) J/Wareega Lam; 0606972 | ee 22.2.88 | Max'ed Cali Jaamac | » | 50.000 | 2/Hargay. |
| 62) J/Wareega Lam; 0657092 | ee 20.2.88 | Maxamed X. Xasan | » | 50.000 | Xarunta |
| 63) J/Wareega Lam; 0093169 | ee 5.5.88 | Caasha Diiriye Raage | » | 200.000 | Burco |
| 64) J/Wareega Lam; 0679502 | ee 25.4.88 | ——————— | » | 50.000 | Gaalkacyo |
| 65) J/Wareega Lam; 0625161 | ee 24.2.88 | ——————— | » | 5.000 | Boosaaso |
| 66) J/Wareega Lam; 0625579 | ee 14.2.88 | ——————— | » | 4.000 | » |
| 67) J/Wareega Lam; 0529106 | ee 6.3.88 | ——————— | » | 10.000 | Garoowe |

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo Jeegagga Wareega ee sare ku xusan Lambarradoodu ayna ku jirto Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 7.372.000/=, kuwaas oo lala baxay iyaga iyo Khasnaddii ay ku jireenba Burco.

WUXUUNA FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xamar u beddelo Axmed Xasan Salaad oo ah Ganacsade Hantidaas laga dhacay una sameeyo kuwo la mid ah markay ka soo wareegto 30 casho ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda haddaan inta ka horraysa aan is-hortaag laga keenin.

Laascaanood, 11 Agoosto 1988

KAALIYAHA MAXKAMADDA
(Maxamed Cumar Xaaji Cali)

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SOOL
(Sayid Cumar Aadan Maxamed)

L. 448

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cusmaan Cali Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY. In ay dhumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku qoran oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 205.000 kuna qoran magaca J.le Cusmaan Cali Maxamed sida ku cad warqadda lam. 9666 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta tr. 4.9.88;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0878170 | 100.000 | Cusmaan Cali Maxamed | Xarunta |
| 0548086 | 50.000 | » » » | » |
| 349416 | 45.000 | » » » | » |
| 748229 | 10.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lambarradoodu kor ku qoran yihiin oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran magaca Cusmaan Cali Maxamed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 205.000/=.

WUXUU XEERIYEY

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cusmaan Cali Axmed Lacagta radadkeedu yahay Sh.So. 205.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Fasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 449

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Nuuraani Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd lam. 4003 oo laga sameeyey Laanta Q.X.G. ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 42.056 kuna qoran magaca Maxamed Nuuraani Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 9811 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed tr. 8.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962

WAXAA LA AMRAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka lam. 4003 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye kuna qoran magaca Maxamed Nuuraani Maxamuud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 42.056/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Afgooye ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Nuuraani Maxamuud Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 42.056 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 450

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muhumed Xaaji Suuli;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu dhumay Jeeg War. lam. 1064362 oo laga sameeyey Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Warsame Muumin Cumar sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo dt. 7.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1064362 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna qoran magaca Warsame Muumin Cumar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed in ay siiso J.le Muhumed Xaaji Suuli lacagta cadad- keedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 451

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdikariin Sh. Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0373125 oo laga sameeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Jeylaani Munye Qulateen sida ku cad warqadda lam 9985 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe tr. 11.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0373125 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe kuna qoran magaca Jeylaani Munye Qulateen kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdikariin Sh. Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 452

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Jaamac Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0722833 oo laga sameeyey Laanta Gariiwe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26.000 kuna qoran magaca Aamina Jaamac Nuur sida ku cad warqadda lam. 10054 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe tr.———;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0722833 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe kuna qoran magaca Aamina Jaamac Nuur kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Garoowe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed in ay siiso J.le Aamina Jaamac Nuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 26.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 453

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xasan Barre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1209567 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Xasan Barre sida ku cad warqadda lam. 1625 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad tr. 4.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1209567 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran magaca J.le Maxamed Xasan Barre kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Xasan Barre lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 454

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud X. Yuusuf Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. ee Lam. 1121698-1121699 oo laga sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca X. Dahabo Xersi Cumar sida ku cad warqadda lam. 9684 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad tr. 29.8.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 1121698-1121699 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qoran magaca Dahabo Xersi Cumar kuna jirto lacag dhan guud ahaan Shs. 200.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuud X. Yuusuf Xersi lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 200 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 455